

## **WARARKA CCS: Bad-qabka & Hab-maamuuska Amniga ee Kulamada Guddiga Waxbarashada**

Bulshada CCS ee qaaliga ah,

Iyada oo Dugsiyada Magaalada Columbus ay isu diyaarinayaan sanad-dugsiyedka 2024-2025, xaqijinta amniga iyo bad-qabka ayaa weli ah mid ka mid ah mudnaanta ugu sarreeysa/koowaad ee degmada. Si wax looga qabto si firfircoon walaacyada suurtagalka ah ee imaan kara, Degmadu waxay soo ban-dhigaysaa tilaaboooyin amni oo lagu xoojinayo **dhammaan shirarka Guddiga Waxbarashada Columbus**.

**Laga bilaabo 6-da Agoosto, 2024**, dhammaan martida, oo ay ku jiraan shaqaalah CCS iyo xubnaha Guddiga, ka qeyb-galaya shirarka Guddiga Waxbarashada Columbus waxaa baaris qasab ah ku sameyn doona shaqaalah Bad-qabka & Amniga ee CCS. Baaritaannada amniga waxaa ka mid noqon doona adeegsiga biraha wax sheega ee gacanta lagu qabto iyo qalabka wax barista ee socodka lagu dhix maro. Degmadu waxay xaq u-leedahay inay baarto dhammaan alaabta soo galaysa xarumaheeda.

Kahor shir hawleedka, xubnaha Guddigu waxay qaban doonaan saacadaha shaqada xafiiska laga bilaabo 5:15 ilaa 5:45 p.m., galabnimo, taas oo u-oggolaanaysa xubnaha bulshada iyaga oo si gaar ah ula fal-galalay si ay su'aalo u weydiyaan ulana wadaagaan fikradaha ama walaac-yada. Kulamo Hawleedka Guddiga waxa ay bilaaban doonaan 6:00 p.m., galabnimo, wuxuuna ka dhici doonaa Dhismaha Maamulka ee South Administrative Building, 3700 S. High Street, Qolka 825, haddii aan si kale loo sheegin. Dhammaan ka-qaybgalayaasha saacadaha shaqada xafiiska ama shirar hawleedka guddiga joogtada ah waxaa looga baahan doonaa inay soo dhix maraan qalabka baaritaanka ee ku yaal dhinaca woqooyi ee dhismaha.

"Xaqijinta bad-baqabka ardaydeena, shaqaalaheena, iyo booq-dayaashayadu waa mudnaantayada koowaad. Iyada oo ay kor u kacday cabsida bad-qb ee heer qaran ahaan, waxaa muhiim ah inaan hirgelinno tillaaboooyin amni oo la xoojiyay, oo ay ku jiraan qalabka baaritaanada lagu baaro," ayuu yiri Guddiga Columbus.